20. Ma xasuusto inta qof ee nala saarnayd doonta, laakiin xeebta waxaa joogay dad badan iyo dhowr doon yar yar ah oo kale. Heshiisku wuxuu ahaa in \$100 na lagu gaarsiiyo Giriigga, wax intaas ka badan kuma jirin. Waxaa jiray dad kale oo aan u maleynayo inay bixiyeen lacag ka badan, laakiin waxaan la socday qoys Suuriyaan ah oo hore u yaqaanay muqalaska, taasoo sababtay in nalaga qaado lacag yar. Xilligaas waxaa jiray qaxooti ka badan hal milyan oo isku dayayay inay Turkiga ka baxaan, mana jirin cid na celisay. Xeebta Turkiga ma jirin boolis joogay. Masaafadu aad ayay u yarayd, waxaana arki karaynay iftiinka meesha aan u soconay, sidaas darteed safarka kama aanan baqayn. Waxaan u maleynayaa inuu qaatay ku dhowaad hal saac.

Giriigga

21. Waxaan la kulannay doon samatabbixin ah intii aan badda ku jiray, annagoo aad ugu dhow xeebta Giriigga. Waxay nagu wareejiyeen doon kale. Waxan xasuustaa in

¹ Iyadoo lagu saleynayo heerka isdhaafsiga lacagaha ee Lira-da Turkiga sanadkii 2016



doontaas ay dhinaceeda ku sawirneyd calanka Britishka waxaana ku qornaa "United Nations." Waxay na geeyeen xeebta Leros, halkaas oo aan booliska Giriigga kula kulannay. Way na tirakoobeen ka dibna gaari ayay nagu geeyeen xerada qaxootiga. Tirada qaxootiga imaanayay way sii kordheysay, laakiin muddo ayaa nalagu hayay xerada. Faraha ayaa la iga qaaday gudaha xerada, laakiin cidna iima sharxin sababta ama waxa meesha ka socday. Inta aan fahmay waxay ahayd in aan la ii oggolayn in aan jasiiradda ka baxo. Ma aanan helin taageero sharci, mana helin turjumaan. Wax waraysi ah laiiima qaban, mana aqaan haddii aan codsaday magangalyo iyo haddii codsigaas la diiday. Kadib, maalin maalmaha kamid ah, waxaa la i siiyay warqado sheegaya in aan dalka uga baxo muddo lix bilood gudahood ah. Isla markii warqaddaas la i siiyay, waxaan raacay doon weyn oo i geysay Thessaloniki.

22. Waxaan bas u socday Albania ka soo raacay Thessaloniki. Ma bixin wax lacag ah safarkan, waxaana u maleynayaa in dowladda Giriigga ay diyaarisay basaskan. Ma aanan haysan fikrad cad oo ku saabsan waxa dhacayay ama halka aan ku socday. Waxaan la socday koox qaxooti Suuriyaan ah oo aan raacay taladooda. Waxay ila muuqatay in xuduudaha ay kuu furan yihiin haddii aad Suuriyaan tahay. Waxaan kaliya sii socday anigoo rajeynaya in aan helo meel aan ku nagaado oo aan ku badbaado.
23. Waxaan ka soo safray Albania ilaa Talyaaniga anigoo soo maray dalal badan, sida Macedonia iyo Serbia. Safarkan wuxuu ahaa mid aad u adag oo ay ka buuxeen argagaxyo badan oo aan isku dayay in aan illoobo. Mar dambe ma doonayo in aan xusuusto waqtigaas, sidaas darteed kama hadlo.
24. Markii aan Talyaaniga imid, qofkii aan wada safraynay ayaa igula taliyay in aan aadno Sicily. Waxaan go'aansaday in aan raaco oo halkaas ka raadsado shaqo. Waxaan tagnay beer ku taalla tuulo ku taal Sicily, halkaas oo ay joogeen dad Soomaali ah iyo dad kale oo ka soo jeeda waddamo kale kuwaas oo ku sugnaa xaalad la mid ah teyda. Ninka beeraleyda ah ayaa ii soo bandhigay meel aan seexdo, cunto, iyo wax lacag ah haddii aan aqbalo in aan miraha soo guro.
25. Shaqadu waxay ahayd mid sahlan, noloshaanuna way fiicnayd. Waxaan halkaas joogay muddo, kadib markii uu dillaacay cudurka safmarka ah ee Covid-19 oo aan halkaas ku xannibmay, waxaan iska sii waday shaqada anigoo la shaqeynayay saaxiibaday ilaa uu Covid ka dhammaaday. Markii safmarku dhammaaday, waxaan go'aansaday in aan Talyaaniga ka tago sababtoo ah waxaan dareemay in xaaladdayda Talyaaniga aysan waligeed isbeddeli doonin. Waxaan go'aansaday in aan u safro UK si aan magangalyo uga codsado, sababtoo ah Talyaanigu ma laha nidaam wanaagsan oo qaxootiga lagu ilaaliyo. Dadkii aan Sicily la joogay waxay ii sheegeen sheekooyin ku saabsan qaxooti isku dayay inay magangalyo ka codsadaan Talyaaniga kuwaas oo la diiday, kadibna aysan mar dambe wax war ah ka maqlin mas'uuliyiinta. looma fidin wax taageero ah, qaxooti badan ayaana ku seexda teendhooyin waddooyinka sababtoo ah meel ay ku noolaadaan ma haystaan. Waxaan rabay inaan helo nolol ammaan ah oo aan horay uga sii socon karo. Talyaaniga kuma aanan lahayn wax xuquuq ah, waxaan aaminsanaa in aanan waligay awoodi doonin in aan si sharci ah uga shaqeeyo ama uga mid noqdo



bulshada si buuxda. Saaxiibadayda joogay Sicily iyo kuwo kale oo aan ku bartay xeryaha qaxootiga ee Yurub waxay ii sheegeen in qaxootigu Talyaaniga aanay si fiican ula qabsan karin bulshada. Qaar ka mid ah saaxiibaday aan Talyaaniga ku bartay ayaa ka tagay oo aaday UK. Waxayna ii sheegeen safaradoodii iyo meelaha aan u baahanahay inaan aado.

26. Waxaan ka tagay Talyaaniga bishii Nofeembar 2021 anigoo la socda koox ka kooban toddobo saaxiib oo aan kula noolaa Talyaaniga. Dhammaanteen waxaan ahayn qaxooti aan haysan dukumentiyoo sharci ah oo Talyaaniga ku sugan, waxaana dhammaanteen rabnay inaan magangalyo ka codsanno UK, halkaas oo aan aaminsaneyn inaan ku noolaan karno nolol ammaan ah. Waxaan tareen kutagnay Calais.

Waqooyiga Faransiiska

27. Ma xasuusto taariikhda saxda ah ee aan imid Waqooyiga Faransiiska. Waxaan u maleynayaa in ay ahayd wax yar ka hor 16-kii Nofeembar 2024, sababtoo ah hadda waxaan ogahay in taariikhdaas ay ahayd maalintii uu dhacay daad-gureyn weyn oo ka dhacay Dunkirk, halkaas oo aan joogay. Xusuustayda waqtigii aan ku qaatay Calais iyo Dunkirk aad ayay u qalafsan tahay, laakiin waxaan u maleynayaa in aan halkaas joogay wax inyar ka badan toban maalmood kahor inta uu shilku dhicin. Sidoo kale ma xasuusto maalmaha saxda ah ee aan ku qaatay Dunkirk iyo kuwa aan ku qaatay Calais, sababtoo ah marar badan ayaan u kala wareegaynay labadoodaba.
28. Si fiican uma aan baran magacyada ama juqraafiyadda goobaha kala duwan intii aan joogay Waqooyiga Faransiiska. Ujeedaydu waxay ahayd kaliya inaan isku dayo inaan u gudbo UK. Inta badan waxaan ku sugnaa xaalado adag anigoo rajeynayay inaan u gudbo UK si aan magangalyo uga dalbado halkaas. Marnaba ma aanan qorsheynin inaan Faransiiska joogo, waxaana go'aankaas sii xoogeysiiyay markii ay dad Soomaali ah oo ku sugnaa aagga Calais-Dunkirk ii sheegeen in Soomaalida ay tahay inay u gudbaan UK sababtoo ah dadka ka yimid Soomaaliya maka heli karaan magangalyo Faransiiska. Qaar ka mid ah dadka Soomaalida ah waxay ii sheegeen in ay isku dayeen inay magangalyo ka dalbadaan Faransiiska, balse ay muddo aad u dheer sugayeen in go'aan laga gaaro codsigooda. Inta badan dadkaas waxay ku noolayeen waddooyinka intii ay sugayeen go'aanka, sababtoo ah ma aysan helin wax taageero ah oo ka yimid dowladda, sidoo kale looma oggolayn inay shaqeeyaan muddadaas.
29. Waxaan xasuustaa in marka hore aan tagnay Calais, laakiin halkaas ma aanan joogin waqti dheer. Waxaa nala siiyay macluumaadka nin Itoobiyaan ah oo la shaqeynayay koox muqalasiin ah. Saaxiibadayada horey ugu gudbay UK ayaa waxaa caawiyay ninkan, waxayna na siiyeen lambarkiisa. Waxaan kula kulannay isaga Calais, waxaana uu noo sheegay in aan aadno Dunkirk oo aan halkaas ku sugno si aan u ogaanno waqtiga aan u gudbi doonno UK. Saaxiibkay, oo ka mid ahaa kooxda aan safarka kala soo baxay Talyaaniga ilaa Waqooyiga Faransiiska, ayaa mas'uul ka ahaa la xiriirka muqalaska Itoobiyaanka ah si uu u abaabulo safarkayaga UK. Saaxiibkay wuxuu ku sugnaa xaalad la mid ah tan aan ku jiray; wuxuu doonayay inuu UK tago si uu magangalyo uga codsado. Waxaan u maleynayaa inuu muqalaska Itoobiyaanka kala



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD 366/ PD 933

xiriiray WhatsAppka. Anigu ma aanan qaban wax abaabul ah ama go'aan qaadis ah. Kaliya waxaan raacayay wixii uu saaxiibkay u arkay in ay inoo wanaagsan yihiin.

30. Markaan joogay Dunkirk, waxaan ku noolaa teendho ku taal xero qaxooti oo kasoo horjeeda saldhigga basaska iyo suuqa weyn. Waxaan kula kulannay qaar ka mid ah muqalasiinta Dunkirk, laakiin si fiican uma xasuusto iyaga. Waxay noo qaybiyeen labo-labo oo waxay na siiyeen teendhooyin iyo bacaha jiifka. Ma hubo meesha saxda ah ee xeradu uga taallay khariidadda, waxaan kaliya xasuustaa sida ay u ekeyd. Xerada waxaa ku sugnaa boqolaal qaxooti ah, waxaan u maleynayaa in ay halkaas joogeen qiyaastii 700-1,000 qof. Waxay ila muuqatay in xerada loo kala qaybiyay afar qaybood oo kala duwan. Anigu waxaan ku sugnaa qaybta ugu weyn, taasoo ay Kuridiyiintu ugu badnaayeen
31. Laba maalmood ka dib, booliska Faransiiska ayaa yimid oo dadka ka daad-gureeyay xerada qaxootiga. Dhammaan alaabadayadii waa la gubay, waxaana dadka lagu qaaday basas si loo geeyo gobollo kale oo Faransiiska ka mid ah. Intii lagu guda jiray daad-gureynta, saaxiibaday ayaa la iga soocay, waxaana nala saaray basas kala duwan. Aniga waxaa la ii qaaday meel u jirta saddex ilaa afar saacadood Dunkirk, laakiin ma garanayo meesha la ii geeyay. Cidna nooma aysan sheegin halka naloo waday. Markii aan baska ka degay, waxaan raadiyay saldhigga tareenka ee ugu dhow, waxaanan ku noqday Dunkirk. Xilligaas aad ayaan u baqayay oo waan wareersanaa. Ma aanan garanayn meesha aan joogay iyo waxa dhacayay.
32. Waxaan awood u yeeshay inaan la xiriiro saaxiibaday maadaama aan weli haysanay telefoonnadayadii, waxaana isku aragnay Dunkirk maalintii xigtay. Waxaan ku noqday xeradii na laga daad-gureeyay. Waxaa halkaas durba joogay dad badan oo dib ugu soo laabtay. Dadka ayaa mar kale teendhooyin dhistay. Xaaladuhu aad bay u xumaayeen sababtoo ah wax walba waa la burburiyay. Waxaa halkaas joogay shaqaalayasha NGO oo siinayay dadka dib u soo laabtay teendhooyin. Waxaan luminay wax walba, waxaana u baahnayn wax walba oo ay na siin kareen. waxaa sidoo kale jiray gaadiid NGO ah oo qaybinayay cunto.

Qorshayaasha lala sameeyay muqalasiinta

33. Markii aan joognay Dunkirk, waxaa had iyo jeer xerada ku sugnaa muqalasiin oo u tagayay kooxo kala duwan iyaga oo sameynayay qorshayaal. Waxaa jiray meel gaar ah oo xerada ka mid ah oo loo qoondeeyay muqalasiinta, taas oo ka duwan halkii aan deggeneyn. Waxaan u maleynayaa in qaar ka mid ah muqalasiinta ay xerada deggenaayeen, laakiin kuwa xilalka sare hayay waxay xerada imaan jireen habeenkii oo kaliya. Muqalasiinta awoodda badan waxay ku noolaayeen magaalooyinka. Waxaa caddayd in ay lahaayeen lacag badan, iyaga oo ku wareegayay Dunkirk iyaga oo wata baabuurro.
34. Anigu shaqsi ahaan ma aanan la yeelan wax is-dhexgal toos ah oo badan muqalasiinta intii aan joogay Waqooyiga Faransiiska, sababtoo ah anigu mas'uul kama ahayn qorsheynta safarkayaga ama isgaarsiinta maalinlaha ah. Waxaan la kulmay muqalaska Itoobiyaanka ah ee ku sugnaa Calais, laakiin, sida aan kor ku soo sheegay, ma aanan la



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD 366/ PD 933

samayn wax abaabul ah isaga. Sidoo kale, waxaan Dunkirk kula kulmay ninka lacagaha haya, oo ahaa nin Kurdi ah, kaas oo si joogto ah u imaan jiray xerada si uu u sameeyo qorshayaal ku saabsan bixinta lacagta. Wuxuu noo sheegay in ay jirto laba hab oo lacagta lagu bixin karo – mid waa in lacagta la bixiyo ka hor safarka, midna waa in lacagta lagu wareejiyo qof sii deyn doona oo kaliya haddii aan si guul leh uga gudubno Kanaalka.

35. Wadar ahaan, waxaan bixiyay €1,300 si aan u daboolo kharashka safarka ee u dhexeeya Faransiiska iyo UK. Lacagtay waxay ahayd mid aan kasoo shaqeynay Talyaaniga. Ninka horey ugu gudbay UK ee na siinayay talooyinka waxaa kalsooni ku qabay muqalasiinta iyo saaxiibkay, sidaas darteed saaxiibkay ayaa lacagta annaga oo dhammaan toddoba qof ah ku wareejiyay isaga. Waxaan u maleynayaa in lacagta lagu wareejiyay habka bangiga. Ninkan ku sugnaa UK ayaa lacagta haystay ilaa laga xaqiijiyo inaan gaarnay UK, taasoo macnaheedu ahayd in muqalaska uu lacagta heli lahaa kaliya markii aan UK imaano. Ma aanan helin lacagtaydii markii shilku dhacay kadib – ma aanan awoodin inaan la xiriiro ninka ku sugnaa UK kadib shilka, sidoo kale diiradda ma aanan saarin isku dayga inaan lacagta dib u helo maadaama aan soo kabanayay oo aan ku sigtay inaan naftayda waayo.
36. Marnaba ma aanan la kulmin cida ugu sarreysa shabakadda muqalasiinta, laakiin waxaan ka ogaaday sheekooyinka lagu dhex waday xerada iyo xeebta habeenkii ka horreeyay shilka in uu jiray qof madax ah oo maamulayay shabakadda. Muqalasiintii aan arkayna waxay ahaayeen kuwo aad uga hooseeya hoggaanka shabakadda. Waxaan ka maqlay dadka kale ee ku sugnaa xerada Dunkirk in muqalasiintu ay badda u diraan dhowr doon habeen kasta. Waxaan u maleynayaa in habeenkii 23-kii Nofeembar 2021, isla muqalaskii uu diray laba doon oo kale kadib markii doontennu baxday.
37. Waxaan aaminsanahay in qofkii kale ee ka badbaaday shilka uu hayay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shabakadda muqalasiinta, isla markaana uu qaar ka mid ah faahfaahintaas siiyay booliska Faransiiska. Waxaan ogahay in muqalaskii Itoobiyaanka ahaa ee na caawinayay uu ka tagay Faransiiska isla markiiba kadib shilka, oo uu muddo ku sugnaa Jarmalka. Bishii Agoosto 2024, waxaan arkay muuqaal TikTok ah oo muujinaya in uu dib ugu soo laabtay Calais oo uu shaqadiisii halkaas ka sii wado.

Isku dayadii hore ee gudbista

38. Ma jirin wax kale oo aan ka qabanaynay Dunkirk oo aan ahayn sugitaan. Waxaan habeen iyo maalin ku sugaynay xerada, annagoo rajaynayna in muqalaska uu noo sheego marka la gaaro xilligii aan gudbi lahayn. Way igu adag tahay inaan kala saaro maalmaha hadda, maadaama dhammaantood isku milmeen oo u muuqdaan kuwo aan kala sooc lahayn. Waxaan u maleynayaa in habeen kasta oo aan halkaa joogay uu qof ka tirsan shabakadda muqalasiinta noo imaan jiray oo nagu oran jiray, "*Caarwa waa habeenkii aan baxaynay,*" markaas ayaan wada diyaargaroobi jirnay, laakiin mar dambe ayaa naloo sheegi jiray in aysan suuragal ahayn. Waxaan xasuustaa habeen naloo sheegay in mowjaduhu ay ka sarreeyeen 0.7m, sidaas darteed doontu aysan bixi karin.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
 Email: info@habibi-interpreting.co.uk
 Contact: PD 366 PD 933

39. Waxaan isku dayay inaan ka gudbo Kanaalka labo jeer ka hor burburkii markabka ee dhacay 23-kii Nofeembar 2021. Markii ugu horreysay, muqalasiintu waxay noo sheegeen inaan ka ambabaxeyno Calais, inkastoo aan ku sugneyn Dunkirk. Waxaan kaliya qaadanay qaar ka mid ah alaabtayada oo u dhaqaaqnay Calais si aan isku dayno inaan gudubno. Si kastaba ha ahaatee, xitaa ma aanan gaarin xeebta sababtoo ah booliska ayaa na arkay annagoo isku dayeyna inaan waddo ka gudubno. Waxay na amreen inaan dib ugu laabanno xerada. Markii labaad, boolisku waxay naga heleen xeeb u dhow Dunkirk, waxayna naga celiyeen halkaas. Habeenkaas, muqalasiintu waxay nala joogeen xeebta. Wajiyadooda way daboolnaayeen, waxayna wateen qoryo. Inkastoo aysan noo hanjabin, haddana waxay naga qaadayeen sawirro iyo faahfaahin si ay noo so daba galaan oo ay u hubiyaan inaan lacagta bixinnay markaan gaarno halka aan u soconnay.
40. Habeen ka mid ah habeenadii u dhowaa habeenka shilka, kooxdayadii oo ka koobnayd toddobo qof ayaa muqalasiintu u kala qeybiyeen saddex kooxood oo yar yar, waxayna noo sheegeen inaan safarro kala gaar ah samayn doono. Ma garanayo sababta ay sidaas u sameeyeen. Afar ka mid ah kooxdayda waxay baxeen 22-kii Nofeembar 2021, waxayna si nabad ah ku gaareen UK. Anigu kaligey ayaan ahaa, waxaan la baxay 23-kii Nofeembar 2021, doontii quusatay. Labada kale waxay ahayd inay baxaan maalinta xigtay, 24-kii Nofeembar 2021, laakiin markii ay maqleen wararka shilka doonta, way ka noqdeen qorshihii ahaa inay gudbaan. Waxay dib ugu laabteen Talyaaniga: midkood wuxuu magangelyo ka dalbaday Talyaaniga, laakiin saaxiibkayga kale weli wax sharci ah ma haysto, welina wuxuu ka shaqeynayaa beer uu ka gurayo miro iyo khudaar, taas oo aan horey uga shaqeyn jiray.

Aqoonteyda ku aaddan dhibbanayaasha

41. Hore uma aanan aqoon dadka kale ee saarnaa doonta 23-kii Nofeembar 2021. Waxaan imid waqooyiga Faransiiska anigoo la socda qaar ka mid ah saaxiibbadayda oo aan Talyaaniga ka wada nimid, waxaan rajeynayay inaan UK wada tagno, laakiin waa nala kala qaybiyey. 23-kii Nofeembar 2021, kaligay ayaan ahaa.
42. Waxaan la kulmay qaar ka mid ah dadka kale ee saarnaa doonta galab-dhicii 23-kii Nofeembar 2021. Waxaa nala isugu keenay xerada ku taalla Dunkirk, waxaana muqalasiintu nagu amreen inaan socod ku dhex marno keynta. Intii aan ku sii jiray socodka aan ku tagaynay xeebta iyo intii aan sugaynay in doonta la diyaariyo, ayaan bartay qaar ka mid ah dhibbanayaasha. Weli waan xasuustaa wejiyada dhowr qof oo habeenkaas dhintay, laakiin way igu adag tahay inaan qof walba xasuusto. Markii aan kulannay, mugdi ayay ahayd, welina waxa dhacdadaas ka soo wareegatay saddex sano.
43. Waxaa la ii tusay liisaska wajiyada dhibbanayaasha dhowr jeer tan iyo markii shilku dhacay. Inkastoo aan ka aqoonsanayo qaar ka mid ah wajiyadaas la ii tusay habeenkaas, ma xasuusto dhammaantood. Ma aanan wada xiriirin si toos ah qof walba oo saarnaa doonta habeenkaas. Waxaan xusi doonaa magacyada (oo aan ogaaday kaddib shilka) ama sharraxaadda dhibbanayaasha marka aan si gaar ah wax uga xasuusto iyaga.

Tirada dadka saarnaa doonta



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY

Email: info@habibi-interpreting.co.uk

Contact: PD 366 PD 933

44. Anigu shakhsi ahaan ma tirin inta qof ee aan ku saarnayn doonta. Waxaan xasuustaa in ka hor inta aan doonta fuulin, mid ka mid ah muqalasiinta ku sugnaa xeebta uu noo sheegay, "Waxaad tihiin 33 qof." Hadalkaas waxaan ku fahmay Carabi iyo Ingiriisi labadaba. Sidoo kale, waan ogahay in tiradan lagu soo wariyay warbaahinta, warbixinta MAIB, iyo dacwadaha ka socday Faransiiska.
45. Tan iyo markii shilku dhacay, waxaan ogaaday in 27 meyd ah la helay, laba qofna ay badbaadeen (anigu ka mid ahay), iyo in afar qof oo magacooda la yaqaan weli lagu la'yahay shilkaas. Tiradani sidoo kale waxay noqonaysaa 33.
46. Inkastoo aan hubo in muqalasiintu noo sheegeen inaan ahayn 33 qof, haddana ma rumaysni inay tiradaasi tahay midda saxda ah ee dadka saarnaa doonta habeenkaas. Xilligii ay sidaas noo sheegeen, waxaan aqbalay tiradaas iyadoon maskaxdayda uusan ku soo dhicin inaan hubiyo ama su'aal ka keeno wixii ay yiraahdeen. Kaliya tan iyo markii shilku dhacay, marka lai weydiyay inaan dib u xasuusto cidda doonta saarnayd oo aan barbardhigo sawirrada dhibbanayaasha, ayaan bilaabay inaan shaki ka muujiyo tiradan.
47. Waxaan xasuustaa shaqsiyaad saarnaa doonta oo, inta aan ka warqabo, aan lagu darin tirakoobyada la soo wariyay. Waxaan u maleynayaa in muqalasiintu ay naga marin habaabiyeen tirada saxda ah ee dadka saarnaa doonta si aan u aaminno inaysan jirin dad badan oo safraya.
48. Hoos waxaan ku faahfaahin doonaa sababta aan u aaminsanahay in doonta ay saarnaayeen in ka badan 33 qof, taasoo macnaheedu tahay in maydad kale wali la la'yahay ama aan weligood lagu soo darin tirakoobyada:
49. Waxaan xasuustaa in markii aan ku sugneyn xeebta, ka hor inta aanan doonta fuulin, muqalasiintu ay naga dhigeen saddex saf, midkiiba 10 qof, waxayna u muuqdeen inay tirinayeen. Si kastaba ha ahaatee, ma rumeysni inay ku dareen tiradan carruurta la taagnayd waalidkood ee safafka ku jiray. Intaa waxaa dheer, darawalka, wiilkiisa, iyo nin kale ayaa horey ugu sugnaa doonta xilligaas.
50. Markii annagii safnayn xeebta, doonta fuulnay, waxaan ku sugneyn biyo-gacmeedka qiyaastii 20 daqiiqo. Waxaan aaminsanahay in muqalasiintu ay xilligaas doonta ku soo dareen laba ama saddex qof oo kale. Xilligaas, waxaan diiradda saarayay booskeyga doonta, sidaas darteed ma aanan la falgalin dadkaas.
51. Waxaan ogahay in meydka hal ilmo yar oo kaliya, oo aan hadda ogaaday in magaciisu yahay Hasti Rizghar ("**Hasti**"), la helay. Si kastaba ha ahaatee, sida aan xasuusto, waxaa jiray ugu yaraan laba carruur ah oo kale, haddii aanay ka badnayn, oo fadhiyay bartamaha doonta. Carruurtan waxay ahaayeen kuwo aad u yar yar oo ku filan in lagu fadhiisiyo dabta dadka waaweyn ee bartamaha doonta ku jiray
52. Waxaan sidoo kale ogahay in meydadka laba haween ah iyo hal nin oo u dhashay Itoobiya la helay kadib shilka. Si kastaba ha ahaatee, waxaan xasuustaa in laba nin oo Itoobiyaan ah ay doonta saarnaayeen, maadaama ay igu xigeen oo ay ila fadhiyeen doonta dhexdeeda.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact:

PD	366	PD	933
----	-----	----	-----

53. Sida aan hore u sheegay, waxaa dhowr jeer la ii tusay sawirrada dhibbanayaasha. Si kastaba ha ahaatee, sawirradan badanaa waa duug ama waa kuwa aan si fiican u muuqan oo mugdi ah. Dadkan waxaan arkay hal habeen oo kaliya noloshayda, xilli mugdi ah, iyadoo qof walba uu gashanaa dhar badan oo loogu talagalay jiilaalka. Sidaas darteed, way igu adag tahay inaan xasuustayda dadkaas la waafajiyo sawirrada la ii tuso. Tani waxay sii kordhisay jahwareerka, maadaama aan aaminsanahay in ay jiraan dad doonta saarnaa oo aanan weli arkin sawirradda. Si kastaba ha ahaatee, waxaan qirayaa inay macquul tahay inaan ka aqoonsan waayay dadkaas sawirrada la ii tusay.
54. Ugu dambayntii, toddobaad kadib shilka, waxaa jiray laba jeer oo aan ka maqlay booliska Faransiiska in meysad kale laga helay Kanaalka. Si kastaba ha ahaatee, meysadkan ayaa la sheegay inay si xun isu beddeleen sababo la xiriira muddada dheer ee ay biyaha ku jireen. Ma rumaysni in uu jiro qof awood u yeeshay inuu aqoonsado meysadkan ama uu xaqiijiyo inay ka tirsanaayeen doontayadii quusatay. Si kastaba ha ahaatee, waxaan mar walba aaminsanaa inay yihiin kuwa naga tirsanaa, sababtoo ah ma aanan maqlin wax kale oo dhimasho ah oo ku saabsan doon kale oo ka dhacay Kanaalka xilligaas.
55. Dhammaan arrimahan oo isku dhafan waxay ii sababeen inaan aamino in runtii ay jireen in ka badan 33 qof oo saarnaa doonta 23/24-kii Nofeembar 2021.

Xasuusta dadka saarnaa doonta

56. Waxaan xasuustaa in inta badan dadka saarnaa doonta ay ahaayeen Kurdiyiin. Waxaa jiray rag badan oo Kurdiyiin ah, qiyaastii afar dumar ah oo Kurdiyiin ah, iyo dhowr carruur ah oo Kurdiyiin ah. Dhab ahaantii, ma aanan la xiriirin dadka Kurdiyiinta ah ee doonta saarnaa, maadaama aanan ku hadlin luqadooda, inta badanna waxay fadhiyeen dhinaca kale ee doonta
57. Mid ka mid ah haweenka Kurdiyiinta ah waxay wadatay saddex carruur ah. Waxaan hadda ogahay in magaceedu yahay Kazhal Ahmed Khdir Al-Jamoor. Waxaan kaliya maqalay iyadoo ka oranaysa "carruurteyda," laakiin markii aan arkay sawirrada warbaahinta iyo intii ay socdeen dacwadaha sharciga ah, waxaan awood u yeeshay inaan aqoonsado carruurtaas oo ah Hadiya Rizghar Hussein, Mubin Rizghar Hussein, iyo Hasti Rizghar Hussein. Ma aanan la hadal iyada habeenkii shilka, laakiin si fiican ayaan u xasuustaa qoyskaas, waxaana hore ugu arkay xerada Dunkirk.
58. Waxaan sidoo kale xasuustaa ugu yaraan laba carruur ah oo kale oo yaryar, kuwaas oo aan aaminsanahay inay Kurdiyiin ahaayeen, inkastoo aanan weligay arkin sawirradda tan iyo shilka. Ma aanan la hadlin carruurtaas doonta dhexdeeda, mana hubo cidda ay la socdeen. Dumarka iyo qoysaska Kurdiyiinta ah waxay fadhiyeen bartamaha doonta, waxaana adkeyd in lagu kala aqoonsado kooxaha dadka sababo la xiriira mugdiga. Si kastaba ha ahaatee, waxaan xasuustaa in ay jireen carruur kale oo yaryar, marka laga reebo Hasti, intii aan soconaynay keynta iyo intii aan saarnayn doonta.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD 366/ PD 933

59. Waxa jireen laba nin oo Masri ah, aabbe iyo wiilkiisa, iyo nin kale oo ku hadlayay Carabi, laakiin ma hubo inuu Masri ahaa. Iyagu waxay mas'uul ka ahaayeen wadista doonta, buuxinta shidaalka, iyo qabashada GPS-ka.
60. Waxaa jiray laba nin oo hortayda fadhiyay doonta intii aan saarnaa, kuwaas oo u muuqday inay ahaayeen aabbe iyo wiilkiisa. Xilligaas, waxaan u maleynayay inay ka yimaadeen Pakistan sababtoo ah waxaan filayaa inay ku hadlayeen af-Urdu. Si kastaba ha ahaatee, hadda waxaan ogahay in meydadka afar nin oo Afghani ah la helay kadib shilka. Waxay u muuqataa inay suurtagal tahay in raggii aan u maleynayay inay ka yimaadeen Pakistan ay runtii ka soo jeedeen Afghanistan.
61. Waxaa jiray nin u dhashay Vietnam. Waxaan xasuustaa inuu lahaa timo dhaadheer.
62. Waxaa sidoo kale jiray koox Itoobiyaan ah. Waxaan xasuustaa laba haween oo Itoobiyaan ah, kuwaas oo labaduba ahaayeen kuwo yaryar oo dhuuban. Kadib markii la ii tusay sawirrada, waxaan hadda ogahay in magacyadoodu ahaayeen Niyat Ferede Yeshiwendim iyo Meron Hailu. Sidoo kale, waxaan xasuustaa nin aad u dheer oo Itoobiyaan ah oo ku hadlayay Ingiriisi. Hadda waxaan ogaaday in magaciisu ahaa Fikeru Shiferaw ("**Fikeru**"). Waxaan xasuustaa inuu jiray nin kale oo Itoobiyaan ah oo la socday Fikeru, kaas oo aan aaminsanahay in meydkiisa weli aan la helin.
63. Ugu dambayntii, waxaa jiray aniga iyo Halima Mohamud Shikh ("**Halima**") oo ka soo jeeda Soomaaliya. Waxaan la kulmay Halima markii aan ku soconaynay keynta si aan u gaarno xeebta halkaas oo doonta na loogu diyaarinayay. Waxaan xasuustaa in Halima ay xirnayd dhar dhaadheer, sida haweenka Soomaalida dhaqanka u ah, iyo jaakad weyn oo ay dusha ka xirnayd. Waxaan sidoo kale xasuustaa in ay wadatay iPhone. Ma aynaan hadal wax badan waqtigaas sababtoo ah waxaa nalaga doonayay inaan aamusanaahay inta socodka lagu jiro. Markii aan tagtay xeebta oo aan aragnay qaar ka mid ah muqalasiinta oo diyaarinaya doonta, Halima waxay i weydiisay haddii aan caawin doono haddii ay caawimaad u baahato inta aan safarka ku jirno. Waxaan u sheegay inay igu kalsoonaan karto, aanna sameyn doono wixii aan awoodo. Waxaan ku hayay sawirrada Halima telefoonkeygii hore, sababtoo ah kadib shilka waxaa ila soo xiriiray ilma adeerkeed. Waxaan ku wada hadalnay telefoonka intii aan ku jiray isbitaalka, wuxuuna i weydiiyay haddii Halima ay doonta saarnayd iyo haddii ay dhimatay. Markii uu ii soo diray sawir, waxaan isla markiiba aqoonsaday Halima, inkastoo uu ahaa sawir hore. Waxaan u maleynayaa in Halima ay koox kula jirtay dadkii Itoobiyaanka ahaa ee nala socday intii aan keynta maraynay, dhammaanteenna waxaanu wada fadhinnay meel isku dhow doonta gudaheeda.
64. Dadka doonta saarnaa dhammaantood waxay xirnaayeen dhar madow oo diirran, maadaama ay ahayd habeen aad u qabow oo bisha Nofeembar ah.

Dhacdooyinkii 23/24 Nofeembar 2021

Ka tagitaanka Faransiiska

65. Kooxdayada ayaa ka soo dhaqaaqday xerada ku taalla Dunkirk xilli uu mugdi soo galayay. Waxay ahayd kadib salaaddii Maqrib, sidaas darteed waxaan u maleynayaa



inay ahayd abbaaraha 5 galabnimo. ² Waxaa nala socday laba muqalas, mid na horkacayay iyo mid kale oo na daba socday. Waxaan soconaynay qiyaastii laba saacadood, inta badan mugdiga, annagoo inta badan aamusan. Waxaan ku soconaynay jidka tareenada, sidaas darteed waxaa jiray nalal daciif ah oo na ifinayay. Tartib ayaan u soconaynay sababtoo ah kooxdayada waxaa ku jiray haween iyo carruur.

66. Kadib laba saacadood oo socod ah, waxaan gaarnay goobta laga bilaabayay safarka. Waxaan tagtay xeeb ciid leh oo sidoo kale ku yaalleen dhowr geed iyo dhir yaryar. Doonta (dinghy) waxay taalay xeebta, waxaana jiray shan qof oo ku mashquulsanaa inay aaryo ka buuxiyaan doonta. Waxay ahaayeen muqalasiinta, kuwaas oo meesha ka dhaqaaqay markii doonta la buuxiyay oo aan u diyaar garownay inaan safarka bilowno. Waxaan u maleynayaa inay dhameeyeen buuxinta doonta abbaaraha 9-kii fiidnimo, halka abbaaraha 10:00-kii fiidnimo aan bilownay inaan doonta fuulno.
67. Ninka Masriga ah ayaa muqalasiintu u xilsaareen inuu doonta hago. Waxaa la socday wiilkiisa oo u muuqday inuu ku jiray da'da tobaneeeyada dambe ama bilowga labaatameeyada. Ma aqaan sida ay ku noqdeen darawalka iyo hagaha doonta. Muqalasiintu waxay kula qaateen aabbaha nus saac xeebta iyagoo kula hadlayay af-Carabi. Waxaan u maleynayaa in la barayay sida loo gaaro Dover, sida loo wado doonta, iyo sida looga isticmaalo GPS-ka qalabka loo dhiibay. Qalabkaas wuxuu ahaa mid weyn oo madow ah, kaas oo lahaa GPS.
68. Darawalka waxaa la siiyay tilmaamo ku saabsan waxa uu sameyn doono haddii wax cilladi dhacaan, iyo sidoo kale lambarada degdegga ah ee uu wici karo. Ma garanayo faahfaahinta saxda ah ama macluumaadka la siiyay, laakiin markii doontu cilad gashay, wuxuu u muuqday inuu haystay macluumaad ku saabsan cidda uu la xiriiri karo.
69. Muqalasiintu iima sheegin waxa la sameeyo haddii xaalad degdeg ah timaado. Intii aan ku sugneyn xeebta, muqalasiintu waxay inta badan la hadlayeen darawalka iyo wiilkiisa. Muqalasiintu waxay annaga noo sheegeen kaliya inaan diyaar garowno. Waxaan rabay inaan weydiiyo su'aalo, laakiin ma u helin fursad. Waxaan ogaa in dadka nagu soo xiriiriyay muqalasiinta ay si nabad ah u gudbeen, sidaas darteed waxaan dareemay inaan ku kalsoonaan karo. Waxaan aqaanay dhowr qof oo si nabad ah ugu gudbay UK, sidaas darteed waligay ma aanan maleyn in masiibo sidan oo kale ah ay dhici karto. Afar ka mid ah saaxiibbadayda oo aan Talyaaniga ila Dunkirk soo wada safarnay ayaa si nabad ah uga gudbay habeenkii ka horreeyay. Waxaa jiray doonyo badan oo safarka ku jiray, laakiin kaliya doontenna ayaa quusatay.
70. Intaan xeebta joognay, muqalasiintu waxay noo sheegeen in nala aqbali doono inaan nahay magangelyo-doon markii aan gudaha u galno biyaha Ingiriiska. Tani mar walba waxay ahayd fahamkayga iyo ujeeddadayda. Waxaan filayay in mas'uuliyiinta Ingiriisku na soo qaadi doonaan kadibna aan halkaas ku dalban doono magangelyo. Si sax ah uguma fikirin sida uu nidaamku u shaqeynayo ama sida aan ku ogaan lahayn inaan gudaha u galnay biyaha Ingiriiska. Waxa kaliya ee aan ogaa waxay ay ahayd

² Dhammaan waqtiyadu waxay ku qoran yihiin Waqtiga Bartamaha Yurub (UTC+1) haddii aan si kale loo sheegin.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY

Email: info@habibi-interpreting.co.uk

Contact:

PD	366/
----	------

PD	933
----	-----

inaan doonayay inaan magangelyo dalbado marka ugu horreysa ee aan la kulanno mas'uuliyiinta. Shakhsi ahaan, laima siinin tilmaamo kale oo ku saabsan waxa la sameeyo marka ay mas'uuliyiinta UK na qabtaan. Tani waxay noqon kartaa sababtoo ah ma aanan ku hadli karin Ingiriis badan, inkastoo aan qaar ka fahmi karayay. Kahor intii aanan bixin, muqalasiintu waxay kooxdayada ka weydiiyeen cidda ku hadli karta Ingiriis. Waxaan filayaa inay markaas dadka ku hadli kara Ingiriiska u sheegeen lambarrada telefoon ee ay wici karaan haddii doonta cilad soo wajahdo.

71. Markii aan xeebta joogney, qof walba wuu aamusnaa, waxaana u maleynayaa in carruurta ay walwalsanaayeen. Muqalasiintu waxay qof walba siiyeen jaakadaha badbaadada. Dhammaanteen waan xirannay jaakadaha badbaadada, xitaa carruurta. Jaakadaha oo dhan waxay ahaayeen nooc isku mid ah — oranji ah oo leh xariijimo ka samaysan wax iftiimaya, kuwaas oo lagu xirayay qalab ku yaalla dhexda. Ma aqaan waxa ku jiray jaakadahaas, laakiin ma ahayn nooca la buufiyo. Waxay u muuqdeen kuwa laga buuxiyay suuf. Jaakadahani waxay si fiican u anfici kareen dadka miisaankoodu yar yahay. Ragga ama haweenka waaweyn, jaakaduhu ma awoodi lahayn inay ku haayaan biyaha dushooda haddii aysan dhaqaaqayn. Doontu ma lahayn wax kale oo ah qalab badbaado.
72. Sida aan ku sharxay qaybta §49, muqalasiintu waxay nagaliyeen saddex saf xeebta ka hor intaan doonta fuulin, markaasoo ay na tiriyeen oo noo sheegeen inaan nahay 33 qof. Doontii la buufiyay waxaa la geliyay biyaha, kadibna dadku waxay bilaabeen inay mid mid u fuulaan. Dadku waxay doonta u fuulayeen si tartiib ah oo aan lahayn wax degdeg ah. Anigu waxaan ka mid ah dadka ugu dambeeyay ee doonta fuula. Waxaan ku qasbanaaday inaan dhex galo biyaha oo ii gaarayay ilaa xudduntayda. Lughaygu way qoyanaayeen markii aan doonta fuulay.
73. Hal ama laba ka mid ah muqalasiinta ayaa markii hore nala soo fuulay doonta. Waxaan u maleynayaa inay hubinayeen in wax walba si sax ah loo diyaariyay. Intii dadku ka fariisanayeen boosaskooda doonta, waxaa jiray dhaqdhaqaaq muujinayay in muqalasiintu mararka qaar doonta ka degayeen, dib ugu laabanayeen xeebta, kadibna mar kale doonta soo korayeen. Ma fahmin dhab ahaan waxa dhacayay, laakiin waxaan xasuustaa in markii inta badan dadku fariisteen doonta, muqalasiintu ay keenaan laba ama saddex qof oo kale. Ma garanayo halka dadkaas ay ka yimaadeen ama sababta loogu soo daray goor dambe.
74. Doonta waxay ahayd mid bunni khafiif ah, waxaanan u maleynayaa inay ahayd qiyaastii 8 mitir oo dherer ah. Dadka waaweyn waxaa lagu fadhiisiyay dhinacyada buufsan ee doonta, halka qoysaska leh carruurta yaryar la geliyay bartamaha. Waxaan qiyaasayaa inay dhinac walba fadhiyeen qiyaastii 14 qof ama ka badan. Darawalka, wiilkiisa, iyo ninka shidaalka ku shubayay waxay fadhiyeen dhinaca dambe ee doonta oo u dhow matoorka. Inkastoo aanan lahayn wax waayo-aragnimo ah oo ku saabsan doonyaha, waxaan xasuustaa in matoorka uu u muuqday mid yar oo aad u buuq badan. Doonta sidoo kale waxaa saarnaa laba taangi oo shidaal ah oo ku yaallay dhinaca dambe, agagaarka matoorka.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY

Email: info@habibi-interpreting.co.uk

Contact:

PD

 366/

PD

 933

75. Doonta waxay ahayd mid aad ciriiri u ah, waanan is dulsaaranaynay. Waxaan ku fadhiyay dhinaca dambe oo aan ka soo horjeeday laba nin oo aan hadda fahamsanahay inay u badan tahay inay ka soo jeedeen Afghanistan, iyo Halima. Waxaan si toos ah u dhinac fadhiyay Fikeru, halka dhinaciisa kale uu ka fadhiyay ninka kale ee Itoobiyaanka ah. Waxaan u maleynayaa inay jiraan dhowr wiil oo Kurdiyiin ah oo dhinaca kale iga fadhiyay, laakiin lama aanan falgelin iyaga. Waxa iga xigtay darawalka, wiilkiisa, iyo ninka shidaalka ku shubayay doonta qiyaastii laba ama saddex qof oo keliya. Darawalka wuxuu doonta ka hagayay dhinaca dambe isagoo isticmaalayay gacanta hagidda oo u dhowayd matoorka. Waxaan awooday inaan xoogaa la hadlo iyaga, sidoo kalena aan fahmo wada hadalladooda intii aan ku jirnay doonta, maadaama aan ku hadli karo af-Carabi.
76. Hadda oo aan dib u milicsado, waxaan garowsanayaa in aan naftayda gelinayay xaalad khatar ah markii aan doontaas fuulay, laakiin markii aan baxaynay, dhab ahaantii ma aanan dareemin cabsi gaar ah. Aad ayaan ugu faraxsanaa inaan ugu dambayntii u safro UK oo aan ka tago Dunkirk. Qof walba wuxuu lahaa safar uu rabay inuu dhammaystiro, waxaan filayaa in dhammaanteen kaliya aan rabnay inaan sii wadno. Dadku ma wada hadleen wax badan. Waxay u muuqatay in qof walba uu diiradda saarayay safarka horyaalla oo isku dayayay inuu is dejiyo.
77. Cimiladu way fiicneyd markii aan billaawnay safarka, inkastoo aw qabow jiray oo roob ka da'ayay xeebta. Biyaha markii hore way degganaayeen, in kasta oo ay jireen mowjado yaryar oo aad u hooseeyay. Habeennadii hore ee aan isku diyaarinayay inaan ka gudbo, muqalasiintu waxay noo sheegeen inaysan ammaan ahayn sababta oo ah xaaladaha cimilada oo xumayd. Habeenkan, si cad ayay u rumeysnaayeen inay ammaan noqon doonto in la gudbo.

Doonta Dhexdeeda

78. Waxaan ka dhaqaaqnay xeebta abbaaraha 10-kii fiidnimo markii qof walba uu doonta fuulay. Qaar ka mid ah ragga Kurdiyiinta ah ayaa muqalasiintu siiyeen mashiinno hawada lagu buufiyo si ay doonta ugu isticmaalaan. Waxaan u maleynayaa inay si joogto ah ugu isticmaalayeen intii safarka lagu jiray si ay cadaadiska hawada u sii kordhiyaan.
79. Qiyaastii saacad kadib markii aan safarka bilownay, waxaa na arkay ilaalada xeebaha ee Faransiiska. Way nasoo aadeen si ay u eegaan waxa aan sameynaynay, iyagoo nal nagu ifiyay. Waxaan xasuustaa inaan arkay calanka Faransiiska oo ku yaallay doontooda. Doontu waxay ahayd mid weyn, waxaana hubaa inay ahayd ilaalada xeebaha ee Faransiiska. Waxaan ka maqlay dadka aan kula kulmay xerada Dunkirk in tani ay mararka qaar dhacdo, isla markaana doonta Faransiiska ay ni daba socoto ilaa aad ka gaartaan biyaha Ingiriiska.
80. Ma xasuusto wax wadahal ah oo na dhexmaray ilaalada xeebaha ee Faransiiska, laakiin waxaan xusuustaa in dadkii doonta saarnaa ay si hoose u sheekaysanayeen iyagoo ka hadlayay waxa doontaas ay ahayd. Waxaan xusuustaa in midkood, darawalka ama ninka shidaalka ku shubayay doonta, uu kala hadlay muqalasiinta



telefoonka, isagoo u sharaxaya in doon kale na daba socoto. Kadib wicitaankaas, wuxuu noo sheegay in aynaan u baahnayn inaan walwalno, sababtoo ah muqalasiintu waxay xaqiijiyeen in ay tahay ilaalada xeebaha Faransiiska.

81. Ilaalada xeebaha Faransiiska wax su'aalo ah nama weydiin. Kaliya waxay nala joogeen agagaarka doonteen muddo gaaban. Taasi waxay safarka ka dhigtay mid sahlan sababtoo ah nalka ka imanayay doontooda ayaa noo ifinayay jidka, taas oo noo suurta gelisay inaan aragno waxa naga horreeya.
82. Qiyaastii saacad kadib, way naga tageen. Wax tilmaamo ah nama aysan siinin, kaliya way naga dhaqaaqeen oo doontooda ayay dib u wareejiyeen. Waxaan moodayay in tani ay ka dhigan tahay inaan gudaha u galnay biyaha Ingiriiska, sababtoo ah waxaan sidaas ka maqlay dadka kale ee Dunkirk, laakiin fikraddan cidna lama aanan wadaagin.
83. Waxaan ka maqlay dadka ku sugnaa Dunkirk in ilaalada xeebaha Faransiiska ay badbaadiyaan dadka haddii ay u baahdaan caawimaad iyagoo ku sugan biyaha Faransiiska. Toddobaad ka hor intii aysan doontayadu quusan, doon kale ayaa isku dayday inay ka gudubto. Matoorkii ayaa ciladowbay intii doontu ku jirtay biyaha Faransiiska, markaas ayay ilaalada xeebuhu waydiiyeen haddii ay rabaan inay safarka sii wataan ama ay rabaan inay dib ugu laabtaan Faransiiska. Waxay go'aansadeen inay ku laabtaan Faransiiska. Waxaan aaminsanahay in haddii aan weli ku jirnay biyaha Faransiiska markii aan wacnay lambarrada degdegga ah, nala badbaadin lahaa.
84. Wax yar kadib markii doonta Faransiiska ay naga dhaqaaqday, darawalka Masriga ah ayaa tilmaamay nalal ka muuqday meel fog, isagoo noo sheegay, "Waxaan ku jirnaa biyaha Ingiriiska, oo waxaan ku dhowaanayna halka aan u soconno." Wiilka darawalka ayaa watay GPS-ka, dhammaanteenna waxaan aragnay nalalka naga horreeyay. Waxaan u maleynaynay inaan ku guuleysan doono safarka. Si kastaba ha ahaatee, waxaan bilownay inaan dhibaatooyin la kulanno wax yar kadib arrintan.
85. Dhibaatooyinku waxay bilaabmeen abbaaraha 2:00 habeennimo, markii biyuhu ay bilaabeen inay soo galaan doonta. Waxaan u maleynayaa inay ahayd qiyaastii afartan daqiiqo ilaa saacad ka hor intii aysan doontu rogman. Waxaan isku dayay inaan dib u milicsado wixii ka dhacay doonta markii biyuhu ay soo galeen, anigoo isku dayaya inaan faahfaahin badan ka bixiyo, laakiin way adag tahay inaan si habsami leh u soo bandhigo dhacdooyinka sida ay u kala horreeyeen. Waxaa jira waqtiyo aan si cad u xasuusto, laakiin inta badan waxay u muuqdaan qeylo, oohin, iyo argagax wada socda.
86. Markii hore, biyuhu waxay ka soo gelayeen agagaarka qaybta dambe ee doonta, halkaas oo aan fadhiyay. Bilowgii, biyaha soo galayay way yaraayeen. Dad dhowr ah ayaa bilaabay inay isticmaalaan caagag yaryar si ay biyaha uga shubaan doonta. Xilligaas, doontu weli way socotay, matoorkuna wuu shaqeynayay. Markii doontu ay dhibaato gashay oo biyuhu ay soo galeen, waxaan xasuustaa inaan dhinaca kale ee doonta eegay oo aan arkay in Halima ay aad u baqaysay.
87. Wax yar kadib, biyuhu waxay bilaabeen inay si degdeg ah uga soo galaan qeybta hoose doonta. Biyuhu waxay ku soo galayeen si ka dhaqsiyo badan intii aan ka shubi



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
 Email: info@habibi-interpreting.co.uk
 Contact: PD 366 PD 933

karaynay, waxayna nosoo gaareen jilbaha. Ma jirin wax aan awoodnay inaan sameyno si aan u joojino biyaha ama u hagaajino doonta. Biyaha doonta soo galayay aad bay u qabownaayeen, ilaa heer uu jidhkaygu bilaabay inuu dareen la'aan noqdo.

88. Markii ay biyuhu bilaabeen inay soo galaan doonta, wicitaannadii ugu horreeyay ee caawimaad ayaa la sameeyay. Waxaan aaminsanahay in marka hore la wacay labada dhinacba, Faransiiska iyo Ingiriiska. Ma xasuusto qof gaar ah oo door hoggaamineed ka qaatay doonta ama in ay jirtay qorshe isku dubaridan oo ku saabsan waxa la sameynayo. Biyuhu si degdeg ah ayay ku soo galayeen, annagana waxaan kaliya ka falcelinaynay wax kasta oo dhacayay.
89. Qaar ka mid ah dadka ayaa biyaha ka shubayay doonta, halka kuwa kale ay wacitaanno samaynaayeen. Labo ka mid ah wiilasha Kurdiyiinta ah ee haystay mashiinnada hawada ayaa si joogto ah u buufinayay si ay cadaadiska doonta u ilaaliyaan. Waxa jiray jahwareer badan, maadaama waxyaabo badan ay isla markiiba dhacayeen: dad ayaa isku dayayay inay biyaha ka shubaan doonta, kuwo kale way qaylinayeen ama ooyayeen, qaar ayaa isku dayayay inay dadka niyada u dejiyaan isla markaana hubiyaan in doontu aysan rogman, halka dad kalena ay wacitaanno samaynaayeen, oo ah adeegyada gurmada ama qoysaskooda si ay ugu sheegaan inay khatar ku jiraan.
90. Waxaan maqlayay wacitaanno badan oo ay dad kala duwan ka samaynaayeen doonta isku mar. Waxaan kaliya maqlay dadka oo ku wacaya mas'uuliyiinta af-Ingiriis, mana aanan maqlin qof ku wacaya af-Faransiis. Waxaan sidoo kale xasuustaa inaan maqlay haweeney ku jirtay bartamaha doonta oo u muuqata inay telefoon ku hadlayso ama u dirayso cod-fariina ninkeeda. Way ooyaysay, waxaana u maleynayaa inay ku hadlaysay af-Kurdi, balse waxay u muuqanaysay inay macsalaameynaysay.
91. Anigu shaqsi ahaan ma aanan samayn wax wacitaanno ah intii aan saarnaa doonta. Waxaan telefoonkayga ku duubay bac si aan uga ilaaliyo inuu biyuhu waxyeelleeyo, mana aanan la soo bixin inta lagu jiray safarka. Xitaa ma aanan ka fikirin inaan la xiriir qoyska ama saaxiibbada si aan ugu sheego inaan khatar ku jiro. Sidoo kale, telefoonkaygu waxaa kujiray simkaadh Talyaani ah, mana shaqeyn lahayn. Waxaan ahaa mid aad u naxsan, waxaana isku dayayay inaan si aad u deggan u fariisto si aan uga hortago in doontu roganto. Haddii aan ogaan lahaa in masiibo sidan oo kale ah ay dhici doonto, waxaan isku dayi lahaa inaan goobtayda la wadaago qof aan jeclahay, sidoo kalena aan qoro faahfaahinta qof kasta oo ila saarnaa doonta habeenkaas.
92. Mar uun intii argagaxaasi lagu jiray, dad ayaa la qaylinayay iyagoo leh waxaan ku jirna biyaha Ingiriiska oo waxaan u baahanahay inaan la xiriirno mas'uuliyiinta Ingiriiska. Ma filayo in dadka ay bixinayeen tilmaamo cad, laakiin waxaan xasuustaa inay dadka kula qaylinayeen af-Ingiriis "out of France" iyo inay marar badan ku celcelinayeen "England." Waxaan u maleynayaa in dhowr arrimood ay sabab u ahaayeen aaminsanaanta guud ee ahayd inaan ku jirno biyaha Ingiriiska oo ay tahay inaan diiradda saarno wicitaanka adeegyada gurmada Ingiriiska halkii aan u wici lahayn Faransiiska, laakiin ma xasuusto sida ay dhacdooyinkaas u kala horreeyeen.



93. Waxaan aaminsanahay in ninkii shidaalka ku shubayay doonta uu goobtayada u diray muqalaska, sidoo kalena uu uga warramay dhibaatooyinka ka jiray doonta. Muqalaski ayaa ku amray inuu la xiriiro mas'uuliyiinta UK si caawimaad loo helo, maadaama aan ku jirno biyaha Ingiriiska. Muqalaska wuxuu ku yiri, "Sii soco 2-3 km waadna gaaraysaa Dover." Waxaan maqlay isagoo hadalkan ugu sheegayay darawalka Masriga ah af-Carabi. Darawalka wuxuu ka qaylinayay qaybta dambe ee doonta, isagoo dadka ku amraya inay ay la xiriiraan ilaalada xeebaha ee Ingiriiska.
94. Sidoo kale, mar uun kadib markii dadku horey u sameeyeen wicitaanno badan, qof ii dhowaa oo doonta saarnaa ayaa la xiriiray mas'uuliyiinta Faransiiska, kuwaas oo u sheegeen inuu la xiriiro Ingiriiska sababtoo ah waxaan ku jirnaa biyaha Ingiriiska. Waxaan u maleynayaa in wicitaankan uu sameeyay Fikeru, ninki Itoobiyaanka ah, kaasoo warkaas usoo gudbiyay inta kale ee doonta saarneyd. Macluumaadkan ayaa lala qaylinayay doonta dhexdeeda iyadoo loo adeegsanayo luqado kala duwan.
95. Arrintaas kadib, waxaan aaminsanahay in dhammaan wicitaannada ka socday dhanka doonta ee aan ku sugnaa loo dirayay adeegyada degdegga ah ee Ingiriiska. Ma sheegi karo waxa ka dhacayay dhanka kale ee doonta, maadaama ay waxyaabo badan isla waqtigaas ka socdeen oo aanan si fiican u maqli karin. Waxaan kaliya arkayay haweeney dhallinyar ah oo Kurdiyad ah oo telefoon kula jirta wicitaanno badan iyo dhowr wiil oo dhallinyaro Kurdiyiin ah oo iyaguna wicitaanno sameynayay.
96. Intii safarka lagu jiray, Fikeru wuxuu sidoo kale xiriir la sameynayay muqalaski Itoobiyaanka aha oo aniga ii fududeeyay safarka. Fikeru wuxuu ii sheegay in muqalaskaas uu xaaladda kala socday meelo kala duwan oo safarka ah. Waxaan aaminsanahay in Fikeru uu u sheegay muqalaska in aan dhibaato ku jirno, laakiin ma aqaan haddii uu ka helay wax jawaab ah.
97. Fikeru iyo ninka iga soo horjeeday, oo u muuqday inuu ka soo jeeday Afghanistan, ayaa si isdaba joog ah u wacayay adeegyada degdegga ah ee Ingiriiska. Kuwani waxay ahaayeen dadka aan si cad u maqli karay oo aan si fiican u fahmay intii aan saarnaa doonta. Waxaan xasuustaa inay si joogto ah isku dayayeen inay wacaan, laakiin inta badan wicitaannadooda lagama qaban. Ma hubo haddii taasi ay ahayd in wicitaannadaas laga qaban waayay, ama ay ahayd in wicitaanka laftiisu lagu guuldarreystay sababo la xiriira ciladaha signalka.
98. Waxaan kaliya maqlayay oo fahmay qaybo ka mid ah wicitaannada ka dhacayay agtayda. Waxaan maqlay dad ku qaylinayay telefoonka af-Ingiriis iyagoo leh, "Caawimaad ayaan u baahanahay" iyo "Waan dhiman rabnaa." Waxaan aaminsanahay in mas'uuliyiintii ka qabatay wicitaannadaas ay garowsadeen in xaaladdu tahay mid halis ah sababo la xiriira qaylada iyo buuqa ka jiray doonta. Si kastaba ha ahaatee, ma xasuusto qof lagu wargeliyay in ilaalada xeebaha ee UK ama wax doon gurmada ah ay noo soo socdaan. Waxaan xasuustaa in qaar ka mid ah dadka aan taleefanka ku hadlaynin ay u isticmaalayeen layrarka taleefannadooda si ay u helaan cid kale oo doonta u soo gurmata, balse ma jirin wax ka soo baxay isku daygaas. Wicitaannada ayaa la samaynayay ilaa daqiiqaddii ugu dambaysay ee doontu rogmatay.



99. Intii lagu jiray wicitaankii ugu dambeeyay ee degdegga ah ee aan ka warqabay, kaasoo aan aaminsanahay inuu sameeyay ninkii hortayda fadhiyay, qofka ka jawaabayay wicitaanka ayaa siiyay lambar uu goobtayada ugu diri karo WhatsApp. Wicitaanku wuxuu ku jiray cod-baahiye (loudspeaker), sidaas darteed waxaan maqlay qayb ka mid ah, sidoo kalena waxaan arkayay isagoo isku dayaya inuu lambarka qoro. Tani waa xasuustayda ugu dambeysay kahor inta aysan doontu rogman. Ma aaminsani inuu ku guuleystay inuu lambarka dhameystiro ama uu goobtayada diro. Ma sheegi karo haddii dad kale ay ku guuleysteen inay goobtayada u diraan adeegyada gurmada intii lagu jiray saacadda ama wixii ka badan ee aan dhibaataada ku jirnay, laakiin waxaan aaminsanahay in daqiiqaddii ugu dambaysay kahor inta aysan doontu rogman, in aan goobtayada la dirin.

Kadib Markii Doontu Rogmatay

100. Xilligaas, doonta waxaa ka jiray dhaqdhaqaaq badan, dhinacii aan ku fadhiyayna si degdeg ah ayuu u aarya baxay. Dadku waxay ahaayeen kuwo argagaxsan oo ooynta, waxaana dadka ugu badnaa dhinacayga doonta, taas oo ugu dambeyn keentay inay rogmatay. Mowjaduhu waxay u muuqdeen kuwo aad u waaweyn xilligaas, dhammaanteennana waxaan ku dhacnay biyaha. Doontu waxay ka rogmatay dhinacayga, sidaas darteed waxaan biyaha ugu dhacay dhabardhabar. Waxaan si fiican u xasuustaa inaan dabaal u galay si aan uga baxo doonta hoosteeda, maadaama ay igu dul rogmatay.
101. Qayladhaantii ka dhacday markii doontu rogmatay oo dadku biyaha ku dhaceen waxay ahayd mid aad u xoog badan. Ma aanan maqal wax u eg oo cabsi sidas oo kale ah abid. Ma aanan ka sii fikirin in nala badbaadin doono; dhammaan waxa maskaxdayda ku jiray waxay ahayd sida aan u sii noolaan karo. Waxay ahayd mugdi, waxna ma arki karin. Biyaha aad bay u qabownaayeen, baduna way kacsanayd. Xitaa haddii aad dabaasha si fiican u taqaanay, aad bay u adkeyd inaad ku sii socoto xaaladahaas oo kale.
102. Markii doontu rogmatay oo aan ka soo baxay biyaha hoostooda, waxaan arkay Halima oo si adag ula tacaalaysa biyaha. Ma u maleynayo inay taqaanay sida loo dabaasho, jaakaddii badbaadaduna ma caawinayn. Waxay la qaylinaysay magacayga iyadoo iga codsanaysay inaan caawiyo, iyadoo ku hadlaysay af-Soomaali. Weli mararka qaar qayladeeda ayaa maskaxdayda ka dhex yeerta. Waxaan u dabaashay dhinaceeda, waxaan isku dayay inaan ku celiyo dhinaca doonta si ay u qabsato oo ay biyaha dushooda ugu sabbeyso. Xilligaas, qaar ka mid ah dadka biyaha ku jiray waxay ku mashquulsanaayeen inay isku dayaan inay dib ugu noqdaan doonta, taas oo keentay inay mar kale doontu rogmatay. Waxaan ku dadaalay inaan caawiyo, laakiin ma aanan awoodin inaan badbaadiyo. Waxay ila tahay in Halima ay ahayd mid ka mid ah dadkii ugu horreeyay ee ku haftay.
103. Marka laga reebo xasuustayda ku saabsan Halima, way adag tahay in aan kala saaro dhacdooyinkii ka dambeeyay markii doontu rogmatay. Waxay ahayd waayo-aragnimadii ugu cabsi iyo arxan darrada badnayd ee nolosheyda. Xusuustayda waxaa ku



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY

Email: info@habibi-interpreting.co.uk

Contact: PD 366/ PD 933

qasan qaylo dhaanta dadkii ooyayay oo aan weli maskaxdayda ka maqli karo iyo qabowgii darnaa ee biyaha.

104. Waxa jiray mugdi aad u badan, dad badanna waxay ka qaylinayeen ama ooyayeen biyaha dhexdooda. Ma xasuusto inaan wax badan arkay, laakiin waxaan u maleynayaa in dhowr qof ay si degdeg ah u haften ama ay biyuhu la tageen markii doontu rogmatay, sababtoo ah ma aysan ku soo laaban doonta si ay u qabsadaan. Waxaan u maleynayaa in dhowr qof ay si dhakhso ah u dhinteen sababtoo ah ma aysan aqoonin sida loo dabaasho, jaakadaha badbaadaduna uma aysan adkeyn xaaladaha adag ee aan ku jirnay. Ma xasuusto inaan arkay dumarka ama carruurta oo doonta qabsanaya kadib markii ay rogmatay, marka laga reebo hal cunug oo aad u yar.
105. Cunugan yar wuxuu la qabsanayay doonta dhowr qof oo kale.. Waxaan xasuustaa inuu la tacaalayay inuu ku sii dhaganaado, maadaama mowjaduhu si xooggan u riixayeen oo u jiidayeen. Wuxuu mar uun ka fuqay meesha uu ku haystay, laakiin waxaan awooday inaan qabto oo dib ugu celiyo doonta. Intaas kadib, ma hubo waxa ku dhacay. Waxa kaliya ee aan xasuusto waa inuu agtayda ku sugnaa, isagoo si dhow ugu jira gacmaha nin Kurdi ah muddo dheer.
106. Waxaan doonta ku dheganaa ilaa qorraxdu soo baxday. Intii aan doonta qabsanayay, waxaan sidoo kale isku dayayay inaan biyaha ka sii sabbeeyo ama dabaasho, sababtoo ah way adkeyd in si joogto ah loo sii haysto doonta. Mowjaduhu aad bay u xoog badnaayeen, waxayna marar badan iga siibeen meeshii aan ka haystay doonta. Mar kasta oo taasi dhacdo, si degdeg ah ayaan u dabaalan jiray oo mar kale u qabsan jiray doonta. Waxaan xasuustaa inaan mar kasta maskaxda ku hayay inaan si toos ah ugu soo laabto doonta si aan u qabsado, haddii kale waan hafti lahaa. Waxaan leeyahay xasuusyo ku saabsan dad doontu kafakatay oo biyaha ku hafanayay. Habeenkii markaan seexdo, waxaan maqlaa qayladhaantooda.
107. Waxaan garowsaday inaan u baahanahay inaan sii dhaqaaqo oo aan jidhkayga qaybta sare kululeeyo si aan u noolaado. Waxaan iska bixiyay jaakadaydii oo aan ka hoos xirnaa jaakadda badbaadada. Waxaan watay jaakad culus oo jiilaalka loogu talagalay, taas oo igu adkeynaysay inaan biyaha dushooda ku sabbeeyo. Sidoo kale, waxaan iska bixiyay kabihiisii aan xirnaa, maadaama ay hoos ii jiidayeen.
108. Mar uun kahor inta qorraxdu aysan soo bixin, waxaan arkay diyaarad ii jirta meel aad uga fog. Waxaan xasuustaa inaan isku dayay inaan u haadiyo, laakiin markaan hadda ka fikiro, waxay ila tahay mid gebi ahaanba waali ahayd sababtoo ah diyaaraddu aad bay iiga fogayd.
109. Markii qorraxdu soo baxday, waxaan xasuustaa inaan arkay in qiyaastii 15 qof ama ka yar ay weli ku dhegganaayeen doonta. Ma hubo in dhammaan dadkaas ay weli noolayeen. Waxaan aaminsanahay inay ahaayeen rag oo kaliya, laakiin ma awoodo inaan aqoonsado cidda weli ku dhegganayd doonta. Ma jirin qof lahadlaya qof kale. Ma xasuusto inaan biyaha kula hadlay qofna. Kuwa noolaa waxay ahaayeen kuwo badankood naf-la-caarin ah. Wax kale ma aanan qaban karin. Waxaan arki karayay



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
 Email: info@habibi-interpreting.co.uk
 Contact: PD 366/ PD 933

meydad sabeynaya biyaha agagaarkayaga. Waxaan u maleynayaa in inta badan dadka ay horey u dhinteen ama miyir beeleen.

110. Subaxdii, aaryo badan kuma aysan harin doonta. Ma xasuusto goorta saxda ah ama sababta saxda ah ee aan u go'aansaday inaan doonta sii daayo oo aan dabaasha bilaabo. Waxaan xasuustaa in Mohammed Shekar Ahmad ("**Mohammed**"), oo ahaa qofka kale ee ka badbaaday, uu sidoo kale ku dhegganaa doonta. Waxaan u maleynayaa inuu xirnaa jaakad madow iyo surwaal buluug ah. Ma aanan arkin Mohammed kadib markii aan sii daayay doonta. Ma hubo sida uu Mohammed ku badbaaday ama waxa ku dhacay dadka kale ee doonta ku dhegganaa. Markii ugu horreysay ee aan Mohammed mar kale arko waxay ahayd isbitaalka, markaasoo nalagu wargeliyay inaan nahay kuwa kaliya ee ka badbaaday.
111. Waxaan bilaabay inaan u dabaasho dhinaca doon fog anigoo ka fogaanaya meydadka biyaha ku jiray. Aad bay u fogayd. Waxaan xasuustaa inaan is lahaa, "*Waan dhimanayaa, ma doonayo inaan halkan ku dhinto. Haddii aan dhinto intaan dabaalanayo, ugu yaraan ma dareemi doono.*" Intii aan dabaalanayay, waxaan qaadanayay nasashooyin, intaasoo ay suurtagal tahay inaan hurdo inta aan biyaha dhabarka ugu sabeynayay, kadibna waxaan sii wadaayay dabaasha. Ma xasuusto inaan haystay wax dareen ah oo ku saabsan sida uu waqtigu u socday, laakiin waxaan sidaan u dabaalanayay muddo lix saacadood ama ka badan kadib markii qorraxdu soo baxday.
112. Waxaan xasuustaa in muddo ah ay haweeney Kurdiyad ah ku dabaalanaysay agtayda. Ma aanan arkin iyada oo doonta qabsanaysa, balse si lama filaan ah ayay biyaha igu soo dhowaatay. Ma aqaan magaceeda, mana aanan ka aqoonsan iyada sawirradii dhibbanayaasha ee la ii tusay. Haweeneyda Kurdiyaddu waxay raadinaysay carruurteeda. Waxay ahayd mid waalan oo qaylinaysa oo carruurteeda raadinaysa. Waxay bilaawday inay dib ugu dabaasho dhinaca doonta; waxaan filayaa inay u noqonaysay carruurteeda, waxaana aaminsanahay inay ahaayeen labada carruur ee kale ee aan xasuusto. Waxaan u maleynayaa inay garanaysay in carruurteedu ay dhinteen, laakiin way sii raadinaysay, waxaana ka muuqatay in murugadu ay waalli ka dhigtay. Ma aanan ogeyn inay dhimatay ilaa maalintii xigtay, markaasoo la ii sheegay inaan ahay mid ka mid ah labada qof oo kaliya oo ka badbaaday.
113. Intii aan biyaha ku jiray, anigoo u dhexeeya dabaal iyo sabeyn, waxaan xasuustaa inaan isku diyaarinayay dhimasho. Waan ka quustay rajadii badbaado, waxaan is lahaa, "*Waan dhiman doonaa.*" Waxaan ahaa mid si buuxda u daallan, laakiin jirkeygu wuu dabaalanayay inkastoo maskaxdaydu ay is dhiibtay. Waxay ahayd ciqaab xanuun badan. Waxaan rabay inaan dhinto si uu dhibkaas u dhammaado. Waxaan ku celcelinayay ducooyin, anigoo leh, "*Ilaahow fadlan i dil,*" waxaan isku dayayay inaan hoos u galo biyaha. Milixda biyaha waxay xanuun badan ku ahayd maqaarkayga. Si fiican uma arkayn. Markii la i badbaadiyay, aragtidaydu waxay ahayd mid aad u liidata, waxayna ii muuqatay sida inaan wax ku eegayo dhalo caag ah – wax walba way qasnaayeen oo aad bay u xanuun badnaayeen. Qabow aad u daran ayaan dareemayay, waxayna ahayd mid aan la sii adkeysan karin. Aad bay u adag tahay inaan fahmo sababta ama sida aan u sii socday.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD 366 PD 933

114. Qiyaastii 10 saacadood kadib markii aan biyaha ku jiray ayaa la i badbaadiyay. Waxaa i badbaadisay haweeney Faransiis ah oo iiga timid badda. Waxaan aaminsanahay inay la socotay qoyskeeda oo saarnaa doon kalluumeysi, waxayna i arkeen anigoo biyaha ku jiray. Waxaan xasuustaa inaan arkay iyaga oo ii jira meel fog, waxaana u haadiyay jaakadda badbaadada anigoo cirka u taagay. Waxay ku boodday biyaha oo i soo dabaashay. Waxaan u maleynayaa inay xirnayd nooca dharka dabbasha ee biyaha ka ilaaliya (wetsuit). Waxay dib iigu soo celisay doonta, waxaana la i saaray doontooda. Waxaan aaminsanahay in xilligii la i saarayay doonta aan lumiyay qayb badan oo ka mid ah maqaarka lugahayga, kaasoo horey ugu dhaawacmay biyaha. Ma u xasuusto si sax ah waxa hareerahayga ka dhacayay xilligaas, laakiin waqti kadib waxaa la i geeyay meel diirran oo ku taal doontooda, waxaana la i siiyay biyo iyo rooti. Markii dambe ayaan ogaaday in qoyskani ahaa qoys Faransiis ah oo doonta kalluumeysiga saarnaa – aabbaha iyo saddexdiisa carruur ah (mid qaan-gaar ah iyo laba da'a yar ah), oo ay ku jirtay haweeneydii i badbaadisay.
115. Kadib waxaa la iiga wareejiyay doontan oo la i saaray doon kale, taas oo aan aaminsanahay inay ahayd mid ay leeyihiin ilaalada xeebaha Faransiiska, maadaama aan xasuusto dhowr qof oo xiran direysyo in ay agtayda joogen. Waxaa la igu siiyay ogsijiin doontan gudaheeda, waxaana u maleynayaa inaan markaas miyir beelay. Waxyaabaha xiga ee aan xasuusto waa inaan ku soo toosay isbitaalka Faransiiska. Waxaa isbitaalka iigu warramay qof ii sheegay in baaritaan weyn ay sameeyeen mas'uuliyiinta Faransiiska.
116. Qoyska kalluumeysatada ayaa iigu yimid booqasho isbitaalka, waxayna i siiyeen dhar iyo telefoon. Waxaan wada xiriirnay intii aan ku sugnaa isbitaalkaas, laakiin xiriirkii wuu naga go'ay markii la iigu wareejiyay isbitaal kale oo ku yaalla Faransiiska.

Wixii ka dambeeya 24 Nofeembar 2021

117. Way igu adag tahay inaan si faahfaahsan u xasuusto muddadii ka dambaysay shilka. Waxaan ka soo kabanayay dhaawacyo culus oo jireed iyo kuwo maskaxeed, waxaana igu adag inaan xasuusto muddada aan ku qaatay isbitaallada kala duwan, maadaama maalmaha ay maskaxdayda isku milmeen. Waxaan xasuustaa dhacdooyin gaar ah, laakiin ma awoodo inaan bixiyo taariikho sax ah ama jadwal faahfaahsan oo ku saabsan waqtigaas.
118. Markii aan ku soo toosay isbitaalka kadib shilka, maqaarka badhka hoose ee lugahayga wuu maqnaa. Waxaa jiray xanuun aad u daran, mana aanan socon karin. Waxaa la i siiyay dawooyin badan iyo kareemyo, waxaana ku jiray kursi-curyaan. Waxaan maray baaritaan raajato ah, balse waxaa la ii sheegay in lafahaygu wax dhibaato ah aysan qabin. Koox weyn oo dhakhaatiir ah ayaa la ii qoondeeyay, waxaana la i siiyay sagaal irbadood intii lagu jiray dhowrki bilood, balse ma garanayo waxay ahaayeen. Lugahayga waxay noqdeen kuwo aad u nabarro badan, dhakhaatiirtuna waxay ii sheegeen in milixda biyaha ay sababtay dhaawaca maqaarkayga. Waxaan u tegey saddex ama afar isbitaal oo kala duwan si aan u helo talo caafimaad oo ku saabsan sababta aan u socon waayay, laakiin jawaab kama helin. Muddo kadib iyo markii aan helay daaweynta jireed (physiotherapy), xaaladda way ka soo raynaysay, waxaana awooday inaan socdo.



119. Waxaan kula jiray isla qolka isbitaalka Mohammed, ninka kale ee ka badbaaday shilka. Waxaa qolkayga la keenay subaxdii shilka kadib. Ma xasuusto sida Mohammed loo badbaadiyay. Wuxuu ii sheegay in markii la badbaadinayay lagu xiray maaskaro ogsijiin ah sababtoo ah ma neefsanayn, dhakhaatiirtuna waxay u maleeyeen inuu dhintay. Dhakhaatiirtu waxay markii dambe noo sheegeen labadayadaba in ay mucjiso ahayd inaan nool nahay. Waxaan xasuustaa inuu dhibaato ka qabay mid ka mid ah lugihiisa, laakiin wuxuu awooday inuu ku socdo ul.
120. Aniga iyo Mohammed ma aanan ku hadlaynin isku luqad, sidaas darteed way adkeyd inaan si fiican u wada xiriirno. Inta badan waxaan isku afgaran jirnay annagoo adeegsanayna barnaamijyada turjumaadda ee ku jira taleefannadayada. Ma aanan ka wada hadlin faahfaahinta shilka laftiisa sababtoo ah way adkeyd in aan is fahanno. Si kastaba ha ahaatee, waxaan waqti badan wada qaadanay bilaha ka dambeeyay shilka, waxaana dareemay xiriir dhaw oo aan la yeeshay. Wuxuu ahaa qofka kaliya ee runtii la ii oggolaaday inaan arko.
121. Aniga iyo Mohammed waxaa si joogto ah noo ilaalinayay booliska. Qolkayagii ugu horreeyay ee isbitaalka, waxaan xasuustaa in mar walba ay laba sarkaal oo boolis ah ku sugnaayeen qolka ama ay istaagnaayeen iridda. Waxaa naloo sheegay in tani ay ahayd si amnigayaga loo sugo.
122. Wax yar kadib shilka, waxaa si rasmi ah i wareystay booliska Faransiiska. Booliska waxay i saareen baabuur, waxayna i geeyeen meel wareysi lagu sameeyay. Waxay ii sheegeen inaan kala hadli karin cid kale wixii dhacay. Waxaan aaminsanahay in sababtan darteed la igu wareejiyay isbitaallo kala duwan, maadaama aysan ogolayn inaan hal meel ku sii nagaado si aysan warbaahintu i helin. Aniga iyo Mohammed si aad ah ayaa naloo ilaalin jiray. Xitaa boolisku waxay i raaci jireen xilliyada aan musqusha aadayay.
123. Waxaa la ii ogolaaday inaan isticmaalo taleefankayga muddadaas, laakiin waxaa naloo sheegay inaan marti noo imaan karin oo aanan la hadli karin wariyeyaasha. Taleefanka aan isticmaalayay wuxuu ahaa kii ay haweeneydii i badbaadisay keentay isbitaalka. Taleefankaygii hore wuxuu hallaabay intii lagu jiray shilka. Boolisku waxay isku dayeen inay macluumaad ka soo ceshadaan, laakiin aad ayuu u halleysnaa oo waxba lagama soo ceshan karin. Kadib shilka, waxaa la ii sheegay in aan si toos ah ula hadli karo booliska, mas'uuliyiinta Faransiiska, dhakhaatiirta, iyo Mohammed oo kaliya.
124. Si kastaba ha ahaatee, aniga iyo Mohammed waxaan labaduba la yeelanay dhowr is-dhexgal wariyeyaal kadib shilka, gaar ahaan labadii toddobaad ee ugu horreeyay. Waxaan dooneynay inaan ka hadalno wixii anaga iyo dhibbanayaasha nagu dhacay. Waxaan xasuustaa in isbitaalkii ugu horreeyay ay dad badan oo fara badan dibadda ku sugnaayeen, iyagoo isku dayaya inay helaan macluumaad ku saabsan annaga iyo shilka. Waxaan u maleynayaa in tani ay tahay sababta naloogu wareejiyay meel kale.
125. Qiyaastii toddobaad kadib shilka, waxaan ogolaaday inaan wareysi siiyo BBC-da iyo kanaal warbaahin oo Kurdi ah. Waxaan ku qasbanaaday inaan sidaas ku sameeyo si qarsoodi ah, meel ka baxsan isbitaalka, sababtoo ah boolisku ma doonayn inaan bixino



wax macluumaad ah. Waxaan u sheegay wariyeyaasha inay igula kulmaan bannaanka isbitaalka, meel dhinaca dambe ee baarkinka ah. Waxaan ka codsaday kalkaalisada inay ii ogolaato inaan hawada bannaanka u baxo, kadibna waxaan u baxay si aan ula kulmo wariyeyaasha. Waxaan bixiyay wareysi gaaban anigoo wejigayga qariyay si aan loo aqoonsan. Waxaan sharaxayay wixii dhacay intii lagu jiray shilka waxaanan ka jawaabay su'aalo ku saabsan dhibbanayaasha.

126. Wareysiga waa la soo gaabiyay sababtoo ah waxaa na arkay booliska. Waxay eryeen wariyeyaasha, waxaana maqlay iyagoo canaanaya kalkaalisada. Wariyeyaashu waxay ii ballanqaadeen taageero iyo hab aan magangelyo uga dalbadan karo UK. Waxay ii ballanqaadeen waxyaabo badan si ay iiga dhaadhiciyaan inaan wareysiga siiyo. Si kastaba ha ahaatee, wareysiga kadib, mar dambe wax war ah kama maqlin iyaga.
127. Saddexdii bilood ee ugu horreeyay kadib shilka, waxaan ku sugnaa saddex isbitaal oo kala duwan oo ku yaalla waqooyiga Faransiiska, laakiin ma hubo si sax ah halka ay ku yaalleen. Kadib waxaa la i geeyay goob afaraad, halkaas oo la i siiyay daaweynta jireed (physiotherapy) oo la i baray sida loogu socdo ulaha socodka. Kadib shilka, bilihii badnaa ee aan ku jiray isbitaalka, weligay laima siinin wax taageero maskaxeed ah. Waxaa la iga soo saaray isbitaallada iyada oo aan la i siinin diiwaannada caafimaadkayga, sidaas darteed ma haysto nuqul ku saabsan waxa la iigu daweyay ama darnaanta xaaladdayda. Waxaa hadda laga joogaa saddex sano tan iyo shilka, welina ma aanan helin wax daaweyn maskaxeed ah ama latalin ah oo ku saabsan wixii aan soo maray.
128. Kadib markii aan dhammeystay daaweyntii jireed (physiotherapy), waxaa la i geeyay goob shanaad oo la ii sheegay inaan halkaas ku noolaan doono inta aan ku suganahay Faransiiska. Waxay ahayd nooc ka mid ah guryaha dhaqancelinta oo ku yaallay Paris. Tani waxay ahayd taageerada la ii fidiyay dhanka Faransiiska kadib shilka. Waxay ahayd meel laga bixiyo taageero loogu talagalay dadka qaba xaaladaha maskaxeed ama dhibaatooyinka la xiriira balwadda. Goobtan waxay si aad ah u saameysay caafimaadkayga maskaxeed, maadaama ay igu hareeraysanayeen dad qaba dhibaatooyin aad u daran, taasoo iga dhigtay inaan dareemo sii xun oo aad u cabsi badan. Markii aan u wareegay gurigan ku yaalla Paris, boolisku mar dambe ima waardiyaynayn.
129. Ma aanan ogeyn inaan xaq u leeyahay inaan la hadlo qareen ilaa aan ka baxay isbitaallada oo la i geeyay guriga ku yaallay Paris, halkaas oo mid ka mid ah shaqaalaha bulshada ay ii siisay faahfaahinta qareen. Waxay iga caawisay marxaladihii hore ee dacwadaha dambiyada ee ka socday Faransiiska, xilligaas oo aniga iyo Mohammed aan u soconay maxkamadda ku taal Clichy.
130. Mohammed waxaa loo wareejiyay meel hoy ah oo nooca aniga la ii geeyay la mid ah, qiyaastii 15 daqiiqo u jirta halka aan deggenaa. Waxaan si joogto ah u kulmi jirnay inta badan. Mohammed wuxuu ka tagay Faransiiska dhowr bilood kadib markii uu ku sugnaa hoygaas, wixii intaas ka dambeeyayna ma aanan layeelan wax xiriir ah.
131. Kadib markii Mohammed uu ka tagay, waxaan sii deggenaa hoyga ku yaallay Paris. Xilligaa aad buu iigu adkaa. Bil kasta shaqaaluhu waxay soo dhajin jireen



ogeysiisyo ku saabsan dadka halkaas ku dhintay. Anigu waxaan ahaa qofka ugu da'da yar intii meesha joogtay. Shaqaaluhu hal mar ayay i wareysteen, laakiin waxay ku saabsanayd oo kaliya haddii aan si fiican u cunteeyo oo u seexo. Ma ahayn latalin ama daaweyn maskaxeed. Marar badan ayaan u sheegay inay meel aan aniga igu habboonayn igu dareen, laakiin cidna iima dhagaysan. Waxaan ahaa qofka ugu yar ee halkaas joogay, meel ay ku badan tahay dhimashadu oo aan wax taageero dhab ah lahayn. Ugu dambayntii, waxaan halkaas u isticmaalay inaan seexo oo kaliya, laakiin dhammaan saacadaha aan soo jeedo dibadda ayaan ku qaadanayay.

132. Waxaan halkaas ku sugnaa ku dhawaad sanad, ilaa saaxiibbadayda ku nool Dijon, oo aan ku bartay markii aan ka shaqeynayay Talyaaniga, ay ii sheegeen inaan la noolaan karo iyaga. Weli waxaan haystaa fursad aan ku aado hoyga ku yaalla Paris, mararka qaarna halkaas ayaan aadaa haddii aan u baahdo meel aan ku sii nagaado, laakiin runtii ma jeceli halkaas. Waa meel aad u cabsi badan. Waxaan dareemayaa in si fudud la iigu tuuray halkaas markii aan si jireed uga soo kabtay shilka, kadibna ay mas'uuliyiinta Faransiisku igu hilmaameen.

Xaaladda Hadda

133. Maalin ama laba kadib shilka, waxaa la ii sheegay aniga iyo Mohammed labadaba inaan heli doono rukhsado deggenaansho oo noo oggolaanaya inaan Faransiiska joogno muddo lix bilood ah, sababo la xiriiira wixii aan soo marnay. Rukhsadan ma i oggolaanayso inaan shaqeeyo, wax barto, ama aan ka faa'iidaysto manfacyada guud, sidoo kale kuma xirna dalab magangelyo oo ku saabsan Faransiiska. Horay ayaan rukhsadan u cusbooneysiistay anigoo kaashanaya qareen Faransiis ah. Si kastaba ha ahaatee, rukhsadii ugu dambaysay waxay dhacday Diseembar 2022, waxaana haatan sugayaa talo ku saabsan sida aan u cusbooneysiin karo. Dacwadaha dambiyada ee Faransiiska wali way socdaan, waxaana la filayaa inaanay dhamaanin ka hor dhammaadka sanadka 2025.
134. Waxaan damacsanahay inaan Faransiiska sii joogo ilaa dacwadahaas la soo gabagabeynayo. Waxaan si xooggan u dareemayaa muhiimadda ah in la ogaado xaqiiqada wixii dhacay habeenkaas iyo in ugu dambayn cadaaladda la helo, taas oo aan dareemayo in aniga iyo dhammaan dhibbanayaashu aan u qalanno. Waxaan aaminsanahay in muqalasiinta iyo sidoo kale mas'uuliyiinta Faransiiska loo baahan yahay in si dhab ah loo baaro, waxaana la ii soo jeediyay in dacwadahan ay yihiin habka keliya ee arrintaas loo sameyn karo.
135. Weli ma aanan isku dayin inaan magangelyo ka dalbado Faransiiska. Waxaa la ii sheegay in haddii aan doonayo inaan sameeyo, ay tahay inaan raaco habraaca caadiga ah. Si kastaba ha ahaatee, weli ma hubi haddii aan doonayo inaan Faransiiska sii joogo kadib marka dacwadaha ciqaabta iyo madaniga ah la soo gabagabeeyo. In kasta oo la ii sheegay in tani ay qaadan karto dhowr sano, haddana waxaan weli ka fikirayaa inaan u guuro meel aan ku dareemayo ammaan oo aan ku ilaawi karo wixii dhacay habeenkaas. Waxaan ku noolaa Faransiiska muddo saddex sano ah anigoo aanan lahayn xuquuq aan ku shaqeeyo ama wax ku barto, balse sidoo kale waxaan la socda dacwadaha, taas oo aan



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
 Email: info@habibi-interpreting.co.uk
 Contact: PD 366 / PD 933

dareemayo inay tahay inaan joogo oo aan ka qaybqaato. Ma ka helayo daryeel caafimaad oo wanaagsan Faransiiska. Weligay laima siinin wax taageero caafimaad oo maskaxeed ah, xitaa markii la iga soo badbaadiyay badda oo aan dhowr bilood isbitaal ku qaatay. Waxa kaliya ee la iga daweeeyay waxay ahaayeen dhaawacyadayda jireed.

136. Bilowgii, kadib shilka, ma aanan seexan karin. Mar kasta oo aan indhahayga isku qabto, waxaan arki jiray muuqaalladii aan habeenkaas goobjooga ka ahaa. Waxaa jiray waxyaabo badan oo argagax leh. Iimaankayga iyo diintayda ayaa i caawiyay inaan kasoo kabto, laakiin haddana aad bay u adag tahay inaan ka fikiro, sidaas darteed waxaan isku dayaa inaan iska ilaawo. Waxaan moodayay in waqti ka dib aan joojin doono inaan dib u xasuusto dhacdooyinka, laakiin weli way igu adag tahay inaan habeenkii hurdo, sawirradii dhacdadaasna maskaxdayda ayay kusoo laalabtaan, mana xakameyn karo. Waxaan la kulmaa madax-xanuuno aad u xun marka aan ka fikiro habeenkaas. Aad bay iigu adag tahay inaan dadka kala hadlo wixii dhacay ama aan diiradda saaro xusuustayda. Si fudud ayaan u arki karaa saameynta jireed iyo tan maskaxeed ee dhacdadani ay igu reebtay.
137. Waxyaabo qaar ayaa igu soo kiciya xusuusta—sida markaan arko badda ama biyaha furan, ama markaan ka hadlo wixii dhacay. Waxaan isku dayaa inaan naftayda mashquuliyoo oo aan dhex galo saaxiibbadayda si aan uga fogaado inaan ka fikiro. Waxay u muuqataa mid aan dhab ahayn, sidii riyo. Ma aha in aan ka bogsaday wixii aan soo maray oo aanan ka fikireyn, balse waxaan si ula kac ah uga fogeeyaa maskaxdayda sababtoo ah aad bay u adag tahay in la wajaho. Tani ma u fiicna caafimaadka maskaxdayda, laakiin waa hab nololeed oo badbaado ah. Xaaladda aan ku jiro ma lihi ikhtiyaar kale. Waxaan aaminsanahay inaan ka faa'iidi lahaa la-talin si aan u la tacaalo dhaawicii maskaxeed markaan tago meel xasilloon oo aan si buuxda ula falgeli karo. Hadda ma awoodo inaan sidaas sameeyo, waxaana dareemayaa inaan ahay mid aan degganayn oo aan xasilloonayn marka la eego duruufaha aan ku jiro.
138. Sanad kasta marka ay soo dhowdahay sannad-guurada dhacdadan ee 23/24-ka Nofeembar 2021, waxaan dareemaa inaan maskax ahaan galo meel aad u madow oo waxaan noqdaa mid aad u murugsan. Aad bay u sii adkaataa inaan seexdo ama nasto ama aan ka helo farxad waxyaabaha aan sameeyo. Dhacdadani waxay ahayd tan ugu xumayd ee abid igu dhacda noloshayda, mana filayo inaan si buuxda uga soo kabsan doono weligay.

Gunaanad

139. Waxaan soo maray wax badan nolosheyda. Noloshayda ma ahayn sida dadka kale; mar walba way adkeyd. Ma lihi wax qorshe ah oo ku saabsan mustaqbalka. Waan iska noolahay kaliya. Ma lihi meel aan aado. Hooyaday waxay ku sugan tahay Itoobiya, taas oo aan ahayn gurigeeda. Soomaaliya uma laaban karo maadaama aysan cidna i joogin halkaas. Yemen waa dal dagaallo halageen, waxna iiguma harin halkaas. Ma lihi meel aan gurigayga ku magacaabo.
140. Waxaan dareemayaa masuuliyad weyn oo iga saaran qoysaska dhibbanayaasha noloshooda ku waayay 23/24 Nofeembar 2021. Waxaan aaminsanahay in sabab ka mid ah



sababaha aan u badbaaday ay tahay inaan noqdo codka dadkan oo aan u dagaallamo sidii loo hubin lahaa in qaxootiga aan mar dambe sidan oo kale loo dayacin.

141. Masiibadan waxay ahayd wax qoran. Waxba ma aysan sababin shilka laftiisa, sidoo kale ma jirin qof si toos ah u lahaa mas'uuliyadda in doontu ay aarya baxdo. Laakiin waxa i dhibaya waa in midna dowladda Faransiiska ama tan Ingiriiska aysan qaadan mas'uuliyadda ah inaysan noo imaan si ay noogu gurmadaan. Habeenkaas wax naxariis ah kama helin dhanka mas'uuliyiinta Ingiriiska, taasna awgeed dad badan ayaa noloshooda waayay, anigana waxaan soo maray xanuun badan. Haddii si dhab ah naloo qaadan lahaa, dhammaanteen waan noolaan lahayn. Laakiin si dhab ah nalooma qaadan, waana sababta dad badan ay u dhinteen.
142. Waxaan si kalsooni leh u oran karaa markii wicitaannadaas la sameeyay, waxaan u sheegnay xaaladda dhabta ah ee jirtay. Ilaalada xeebaha ama adeegyada gurmada way ogaayeen xaaladda. Waxaan arkay ninkii Itoobiyaanka ahaa oo oohnaya intuu telefoonka kula hadlayay mas'uuliyiinta Ingiriiska, isagoo u sheegaya inaan dhiman rabno. Laakiin qofna nama danayn oo si dhab ah nooguma imaan si uu noogu gurmado. Waxaan aaminsanahay in nala dayacay habeenkaas. Ma ahayn oo kaliya in qof si degdeg ah noogu imaan waayay, balse qofna gabi ahaanba nooma imaan si uu noo badbaadiyo. Waxaa na helay doon kalluumaysi, taas oo iyadu mas'uuliyiinta u wacday.
143. Waxaan rajeynayaa in baaritaankan uu usoo jeedin doono dareenka dadka xanuunkii aan la kulannay habeenkaas, isla markaana qof uu qaadhan doono mas'uuliyadda oo qirto in arrintan laga hortagi kari lahaa.
144. Waxaan rajeynayaa in baaritaankan uu soo saari doono talooyin dhab ah oo yareyn kara khatarta sidan oo kale ah, si aysan mustaqbalka mar kale u dhicin.
145. Waxaan rajeynayaa in Ingiriiska iyo Faransiiska ay mustaqbalka bartaan inay si wadajir ah u wada shaqeeyaan si ay si habboon u ixtiraamaan nolosha dadka ay ogyihiin inay maalin kasta isku dayayaan inay Kanaalka ka gudbaan. Dadku waxay Dunkirk uga tagayaan sababo la xiriira xaalado adag, waxayna sii wadi doonaan inay safarro halis ah ku maraan Kanaalka si ay u gaaraan Ingiriiska. Habka looga hortagi karo masiibo mustaqbal oo la mid ah middii aan soo maray waa in dadka la siiyo ikhtiyaar kale oo badbaado leh oo ay ku gaaraan Ingiriiska.
146. Masiibadan waxay si weyn u saameysay nolosheyda, laakiin waxaa iga go'an inaan si buuxda uga qayb qaato dacwadaha ka socda Faransiiska iyo Ingiriiska si aan u hubiyo in ugu dambeyn cadaalad la gaaro.



Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD 366/ PD 933

Bayaanka Runnimada

Waxaan aaminsanahay in xaqiiqooyinka lagu sheegay bayaankan markhaatiga ah ay yihiin kuwo run ah. Waxaan fahamsanahay in dacwad lagu soo oogi karo qof kasta oo sameeya, ama sababa in la sameeyo, hadal been abuur ah oo ku jira dukumentu lagu xaqiijiyay bayaanka runnimada isagoo aan rumayn daacad ah ku qabin runnimadiisa.

Saxeex:

Personal Data

Taariikh: 3/1/2025 | 10:11:36 GMT

Magaca: Issa mohamed omar

I have translated the above text from English into Somalian Language to the best of my knowledge, ability and command of both these languages.

Translator-

Name

Date: 27/12/2024